HERITAGE INSTITUTE

FORUM for IDEAS

BAAQ-DARAASADEED
KU SOCDA CILMIBAAREYAASHA

Is-bedelka Cimilada iyo Khilaafaadka Geeska:
Caqabadaha, Xalalka iyo Qorshayaasha Xukuumadaha

Xilliga Shirka: December 4-8, 2022
Goobta: Djibouti
La soo xiriir: callforpapers@heritageinstitute.org

Cimilada adduunka ayaa isu beddelaysa si ka degdeg badan sidii la filayay. Abaaraha, daadadka iyo khilaafaadka la xiriira deegaanka ayaa si joogto ah looga hadlayay sannadihii la soo dhaafay, waxaana la filayaa in ay sii socon doonaan oo ay hareeyaan doodaha caalamka ka socda. Arrintani waxa ay timi xilli ay dawladaha gobolku ku mashquulsan yihiin xallinta khilaafaadka guunka ah iyo khilaafaadka cusub ee la xiriira siyaasadda iyo dhaqaalaha. Khuburada arrimahan ka faalloota ayaa isku raacsan in xaaladdani ka sii darayso, gaar ahaan dalalka Afrika, oo ay ku jiraan waddamada Geeska Afrika.

Si looga falceliyo dhibaatooyinka ku soo wajahan gobolka ee la xiriira khilaafaadka iyo isbeddelka cimilada, waxa uu Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage martigalinayaa daraasad-cilmiyeedyo (Policy Papers) ku saabsan arrimaha la xiriira khilaafaadka iyo isbeddelka cimilida. Warbixinahaas waxa laga jeedin doonaa shir lagu qabanayo Djibouti dhammaadka bisha Noofeenber, oo ay isugu imaanayaan khabiirro, cilmibaareyaal, siyaasad-dejiyeyaal, arday iyo dad u dhaqdhaqaaqa arrimaha bulshada, kuwaas oo madasha shirka ku wadaagi doonaa xaaladaha gobolladooda iyo dhibaatooyinka gobolka ee la xiriira saamaynta ay khilaafaadka iyo isbeddelka cimiladu ku leeyihiin dalalka Geeska Afrika.

Waxa aannu rajaynaynaa in khuburadan oo ka duulaysa caddaymo ku dhisan cilmibaaris ay bulshada u keeni doonaan xalal muhiim ah, oo ka caawinaya sidii ay bulshadu adkaysi badan ugu yeelan lahayd, isla markaana uga gaashaaman lahayd khataraha ka dhasha cimilada iyo sidii ay nabad ugu xallin lahayd khilaafaadka jira.

Cimilada iyo Khilaafaadka Geeska: Caqabadaha, xalalka iyo qorshayaasha xukuumadaha	
Mawduucyada Isbeddelka Cimilada	**Mawduucyada khilaafaadka**
Abaaraha Daadadka Xaalufinta Ka-gaashaamashada La qabsiga Khilaafaadka la xiriira isbeddelka Cimilada	Khilaafaadka ka dhex jira dawladaha ee la xiriira siyaasadda iyo amniga Khilaafaadka gudaha Isku dhacyada kooxaha mintidka ah Khilaafaadka ganacsiga (sida–Qaadka) Khilaafaadka ka dhasha saboolnimada Helitaanka biyaha iyo cuntada

Hagaha nuxurrada-daraasadaha iyo warbiximaha dhammayska-tiran	
Nuxurka daraasadda	**Warbiximaha dhammayskatiran**
Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka	Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka
Waa in ay ku cad yihiin hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu	Waa in ay cad yihiin hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu
Waa in ay ku cad yihiin baaxadda dhibta iyo goldaloolooyinka ay cilmibaaristaadu gufaynayso	**Habraaca Daraasadda**
Habraaca Daraasadda	Milicsi-daraasadeed urursan (Short literature review)
Muhiimadda/waxtarka ay daraasaddu u leedahay arrimaha siyaasadda	Natiijooyinka, falaqaynta, gunaanadka iyo talobiximaha daraasadda
Luqad sax ah ku qoran	**Luqad sax ah ku qoran**
Dhererka: 200 eray	Dhererka: 3,000 ilaa 4,000 oo eray
Xilliga ay ku'eg tahay soo gudbinta Nuxurka Daraasaddu: 25 Sibteenber 2022	**Xilliga ay ku'eg tahay soo gudbinta warbixinaha (Policy paper): 10 Nofeenber 2022**

Waraaqaha oo dhan waxa lagu soo dirayaa cinwaankan: callforpapers@heritageinstitute.org.

Waraaqaha la aqbalo waxa lagu soo jeedin doonaa, laguna daabici doonaa Ingiriisi iyo Soomaali. Wixii intaa ka faahfaahsan nagala soo xiriir cinwaanka kor ku xusan.